Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda

DANJIRE

JANUARY, 2020

Xogside Saddex Bilood ah

Fariinta Hawlwadeenada Danjire

Danjire waa xog-side sedex-biloodla ah,kaas oo ay soo saarto Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL. Waxaanu dadweynaha kula wadaagnaa wixii xog ah ee aanu muhiim u aragno, anagoo kusoo ururina wixii dhacdooyin ah ee la xidhiidha shaqada aanu u idmanahay.

Director

Deputy Director

Head of Promotion

Head of Prodcution

Head of Customer Care

Head of Event Mgt.& Coordination

Wixii talo iyo toosin ah ee aanu ku horumarin karo xogsidahan iyo guud ahaanba shaqada Wasaaradda waxaad nagula wadaagi kartaan Email-ka Wasaaradda: Info@slmof.org ama formka cabashada iyo talooyinka ee Website-ka W.H.Maaliyada www.Slmof.org.

Follow & Subscribe us

Tusmada Xogsidaha

1. Nuxurka Meelaha Ay Diiradda Saari-Doonto Miisaaniyad-Sanadeedka 2020-Ka Oo 18% Ka Badan Tii Sanadkii Hore Ee 2019-Kii ____ 1
2. Madaxweynaha Somaliland Oo Xadhiga Ka Jaray Carwo Lagu Soo Bandhigay Wax-Soo-Saar-ka Warshadaha Dalka ____ 3
3. Wax ka baro buuga miisaniyadda muwaadinka Somaliland 2020 ____ 5
4. Wasiirka Maaliyadda Oo Ka Qayb Galay Dooda Iyo Falan Qaynta Miisaaniyadda 2020 Oo Uu Soo Agaasimay Ururka Cilmi Baadhista Ee ISIR ____ 7
5. Madaxweyne Ku-Xigeenka Somaliland Oo Si Rasmi Ah U Daah-Furay Barnaamij-Ka E-Cash ____ 10
6. Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Goboladda Dalka Ku Qabatay Tababar Ku Saabsan Xeer Nidaamiyaha Maamulka Maaliyadda Iyo Hagaha Dhamayska-tiran ee Habraacy-ada Xisaabaadka ____ 12
7. Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Furay Kulan hawleedka qorshaha Fulinta odoroska Dakhli Ee Waaxda Cashuuraha Barriga ee 2020-ka ____ 14
8. Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Maaliyadda Oo Xubno Ka Mid Ah Maayiradda Dalka U Furay Tababarka Daadajinta Nidaamka Maaliyadeed Ee Dawladaha Hoose ____ 16
9. Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda Somaliland Oo Soo Xidhay Tababarkii Tababarayaasha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda ____ 18
10. Wasaarada Horumarinta Maaliyada Oo Hargeysa Ku Qabatay Kulan Lagu Gorfeynayey Dhaqaalaha Somaliland Iyo Caqabadaha Hortaagan ____ 19
11. Wax Ka Barro Cashuurta Gadista Ee Loo Yaqaanno “GST-ga” ____ 22
12. Shir Lagu Lafo-gurayey Qorshe-Hawleedka 2020-Ka Ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland Oo Hargeisa Lagu Qabtay ____ 23
13. 70 Arday Oo Kusoo Baxay Imtixaankii Barnaamijka Waxbarashadda Ee Maamulka Maaliyadda Ee Pfm-Ka oo Si Rasmi Ah U Bilaabay Waxbarashadoodi ____ 25
14. Kulan Hawleed Lagaga Hadlayey Maamul Wanaagga, Daahfuraanta Iyo Isla Xisaabtanka Oo Hargeisa Lagu Qabtay ____ 27
15. Dedaalada Ku Wajahan Horumarinta Dhaqaalaha Iyo Doorka Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu Ku Leedahay ____ 29
16. Agaasimaha Waaxda Shaqaalaha Ee Wasaaaradda Horumarinta Maaliyadda Ayaa Tobabar U Furay Shaqaalaha Nadaafadda Ah Ee Waasaaradda ____ 31

Nuxurka Meelaha Ay Diiradda Saari-Doonto Miisaaniyad-Sanadeedka 2020-Ka Oo 18% Ka Badan Tii Sanadkii Hore Ee 2019-Kii

Waxaanu Sanadka Cusub Hawl-Galin Doonaa Cashuurta Iibka (Gst) Ee Adeegyada Isgaadhsiinta, Waxaanu Yarayn Doonaa Lacagaha.....”

Hargeisa 25/01/2020 (W.H.M) Wasaaradda Humarinta Maaliyadda JSL iyadoo fulinaysa gudashada waajibaad-ka shaqo ee qaran-ka ugu xilsaaran tahay, isla markaana raacaysa nidaamka Geedi-socodka Diyaarinta Miisaaniyadda ee Xeerka Maamulka iyo Maaliyadda Xeer Ln 75/2016, waxay Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu u raacday diyaarinta Miisaaniyadda iyada oo fulineysa talaabooyinka: Diyaarinta xaashida muuqaalka guud ee miisaaniyadda 2020-ka. sar-goynta mudnaanta kharash-bixinta miisaaniyadda 2020-ka. diyaarinta siyaasadda dhaqaalaha guud iyo maaliyadeed ee mudadda dhexe, 2020-2022-ka. wada tashiga guddi hoosaadka dhaqaalaha iyo miisaaniyadda ee Golaha Wakiiladda, Doodda miisaaniyadda ee wasaaraddaha iyo hay’addaha, gudbinta miisaaniyadda ee golaha wasiiradda. gudbinta miisaaniyadda ee golaha wakiiladda.

Iyadoo raacday dhamaan talaabooyin-kaa, isla markaana si aan dib-u dhac lahayn u fulinaysa, waxay horaantii bisha November/2019 u gudbisay golaha wasiirada JSL miisaaniyadii 29-aad. 17-kii bisha November/2019 Goloha Wasiirada ayaa falanqayn iyo dood-dheer ka dib ayaa aqlabiyad ku ansixiyey Miisaaniyad cadad-keedu dhanyahay 2,751,304,880,098 (Laba Tirilliyan, Todoba Boqol iyo Afar Milyan, Sided Boqol iyo Sideedtan Kun, Sideed iyo Sagaashan Shillin), Miisaaniyadaas oo ka badan tii sanadkii hore ee 2019-kii 18% (Boqolkiiba Sided iyo Toban).

19-kii isla Bisha November/2019 Wasiirka Wasaaradda H.Maaliyadda Dr.Sacad Cali Shire oo ay weheliyaan Wasiir Ku xigeen-kii hore ee wasaaradda Md Cabdiqadir Dhagowayne,

Agaasimaha Guud Md Maxamed Cabdi Gurxan, iyo saraakiil sarsare oo Wasaaradda ahi waxay u gudbiyeen Golaha Wakiiladda JSL Miisaniyada 2020. Wasiir Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire ayey mudanayaashu maalinta weydiimo door ah kaga warsadeen Buuga Odorooska 2020-ka ee uu horkeenay, iyadoo uu Wasiir Sacad dhamaan weydiimihii mudanayaasha si waafiya uga warceliyey. Intaa ka dibna Mudanayaasha Golaha Wakiilada oo uu shir-guddoominayey Guddoomiyaha Golaha Md Baashe Maxamed Faarax ayaa guda-galay ka doodida odoroska Miisaaniyadda. Ugu danbayna waxay mudanayaashu cod aqlabiyad ah ku ansixiyeen Miisaaniyadda, iyadoo ay fadhiyeen golaha 49 mudane, waxa u codeeyey 42 mudane, 7 mudane way diideen gudoomiyuhuna muu codayn, iyadoo sidaasi ansax ku noqotay. Mar la weydiiyey Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Dr.Sacad Cali Shire halka ay ka imanayso lacagta lagu bixinayo faraqa 18%-ka ahi waxa uu yidhi "Waxaanu sanadka cusub hawl-galin doonaa cashuurta iibka (GST) ee adeegyada isgaadhsiinta, waxaanu yarayn doonaa lacagaha dawlada kaga luma kootarabaanka, waxaanu si fiican uga shaqayn doonaa cashuurta macaashul-macaash-ka Daaraha". Odoroos-ka Miisaaniyadda 2020-ka oo ah mid diirada saarindoonta nabad-galyada, ictiraaf-raadinta, horumarinta caafimaad-ka, biyaha, waxbarashada, doorashooyin-ka, daryeel-ka deegaan-ka iyo duur-joogta, wax soo saar-ka beeraha iyo kaluun-ka, macdanta iyo tamarta, iyo kaabayaasha dhaqaalaha. Meelaha la odoroosayo inay Miisaaniyadda 2020-ku ka iman doonto, ayaa waxa kamid ah cashuuraadka kala duwan ee ay muwaadiniinta reer Somaliland bixiyaan oo iyadu halbawle iyo saldhig u ah aas-aaska dawladnimada, waxaana ay waafaqsantahay qorshaha labaad ee (NDPII), isla markaana waxa ay ka turjumaysaa Barnaamijsiyaasadeedkii xisbiga Kulmiye iyo balamihii uu ku galay doorashooyinkii dalka ka qabsoomay 2017-kii.

Ugu danbayna Dhiganaha Odorooska 2020-ka ayaa ah mid isagu is sharaxaya, waxaana lagu daabacay markii ugu haraysay boga Wasaaradda H.Maaliyadda ee (slmof.org) iyo sidoo kale boga Facebook-ga ee Wasaaradda. Waxa sidoo kale laga sameeyey Buug-yare (Budget Citizen Guide), kaasoo kusoo koobaya nuxurka Miisaaniyadda 12 Bog oo kaliya, Buug-yarahan laga sii dheegay Buuga weyn ayaa ku qoran afka Somaliga ee rasmiga ah iyo afka qalaad ee Ingiriisida. Waxaana laga heli karaa goobaha dadweynuhu ku kulmaan sida Hudheelada waaweyn, Xafiisyada Dawlada, Rugta Ganacsiga, Boga iyo Facebook-ga Wasaaradda H.Maaliyadda JSL.

Madaxweynaha Somaliland Oo Xadhiga Ka Jaray Carwo Lagu Soo Bandhigay Wax-Soo-Saarka Warshadaha Dalka

Hargeisa 25/01/2020 - Madaxweynaha Somaliland Mudane Muuse Biixi Cabdi ayaa 26 December 2019-ka xadhiga ka jaray carwo balaadhan oo lagu soo bandhigayo wax-soo-saarka Warshadaha wadaniga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland. Carwadan oo lagu qabtay Hotel Grand Hadi ee magaalada Hargeysa, ayaa waxaa ka soo qaybgalay Madaxweynaha Somaliland Muuse Biixi Cabdi, Wasiirka Maaliyada Somaliland Dr Sacad Cali Shire, Wasiirka ganacsiga, Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga Somaliland, Masuuliyiinta Warshadlayda dalka iyo wefti balaadhan oo ka socday Maamulada dawladd deegaanadaa Soomaalida iyo Oromada ee dalka Ethiopia, kuwaas oo dhamaantood ka waramay ahmiyadda uu qaranka u leeyahay bandhigaasi. Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada Somaliland Dr Sacad Cali Shire, oo wasaaraddiisu gaar ahaana waaxda adeegyada maaliyadeed iyo gacansigu ee Wasaarada Horumarinta Maaliyadu ay door muhiim ah ay ku lahayd qabsoomida Carwadani, ayaa hadal uu halkaasi ka jeediyey Dr Sacad Cali Shire waxa uu ka waramay ahmiyadda ay warshadlayaashu ay ku leeyihiin koboca dhaqaalaha dalka, waxaanu yidhi "Dhaqaalaha waxa loo qaybiyaa afar qaybood, qaybta koowaad waa wax soo saarka Beeraha, Kalluumaysiga iyo Macdanta, qaybta labaadina waa qaybta Warshadaynta, qaybta saddexaadna waa khadamaadka, qaybina waa adeegyada (Khadamaat), qaybina waa qaybta IT-ga iyo Cilmibaadhista. Inagu maanta waxa aynu ka hadlaynaa qaybta labaad oo ah wax-soo-saarka warshadaha. Waxa muhiim ah marka horeba inaynu fahamno ahmiyadda ay warshaduhu leeyihiin, markaa waa maxay ahmiyadda ay warshaduhu leeyihiin? Warshaduhu waxay muhiim u yihiin in labada lugood uu dhaqaaluhu isku taago waddan walba, wadamada horumaray iyo kuwa horumaraya iyo kuwa dhaqaalahoodu hooseeyaba, faraqa u dhexeeya ee kala saaraa waa warshadaha. Wadanba wadanka kale ee uu ka hodansan yahay wuu ka warshado badan yahay, waanu ka soo wax-soo-saar badan yahay, taas ayaa tusaale u ah ahmiyada iyo qiimaha warshaduhu ay qaranka u leeyihiin.

Waxa la yidhaahdaa shaqadii walba ee warshaduhu ay soo saaraanba wax ay abuurtaa saddex shaqo oo kale ayay abuurtaa, warshaduhu waa meelaha xagga wax-soo-saarka loogu tayada badan, sidaa aawadeed qofka ka shaqeeya warshaduhu wuu ka mushahar badan yahay qofka ka shaqeeya Beeraha," ayuu yidhi Wasiirka Horumarinta Maaliyada Somaliland Dr Sacad Cali Shire. Sidoo kale Wasiirka Wasaarada Ganacsiga Maxamed Xasan Sacad (Saajin) oo madasha ka hadlay ayaa isna ka waramay ahmiyada warshadaha. Geeska kale Madaxweyne ku xigeenka maamulka Oromada ee dalka Itoobiya Marwo Jaltu Sani iyo Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha Ismaamulka Soomaalida Itoobiya ayaa labada masuulba ay amaaneen horumarka balaadhan ee Somailand ka socda. Gabogabadii Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland, Muuse Biixi Cabdi waxa uu bogaadiyey dedaalada kala duwan ee warshadlayda dalku ay hayaan iyo horumarka ay ku talaabsadeen "Waxaan doonayaa inaan aad u muujiyo maanta kulankan ku saabsan warshadlayda. Inagu wixii aynu hayno iyo wixii aynu isku sheegayno wuu inoo dhanyahay. Laakiin waxa aynu u baahanahay caalamka gaar ahaan dalalka jaarka ah ee aynu u baahanahay ee ina soo siyaartay fariinta aynu u dirayno aynu ka wadahadalno," ayuu yidhi Madaxweynaha Somaliland Muuse Biixi Cabdi.

Wax ka Baro Buuga Miisaniyadda Muwaadinka Somaliland 2020

Kalmadda Wasiirka

Ka dib dhawr sannadood oo adkaa, dhaqaalaha Somaliland waxa uu hadda yahay mid soo kabanaya. Siyaasadaha dawladda ayaa ka qayb qaatay in qiimayaashu halkii u hooseysey yimaaddaan muddo laba sannadood ah, qiimaha lacagteeniina kor u soo kaco. Koritaankii ayaa dib madaxa ula soo kacay, mudda ganacsiguna waa xoogeystey taas oo suurtagelisey in dawladda Somaliland u hirgeliso muwaadiniinnta mashaariic iyo adeegyo. Waxa kale oo horumarradanu ku suurtagaleen iyada oo dib-u-ha-baynno lagu sameeyey sida loo maareeyo maaliyadda dawladda. Miisaaniyadda 2020 waxa ay u diyaarisey taageero dheeraad ah meelaha uu muwaadinku uga baahan yahay mudnaan-siinta sida: Adkaynta ammaanka, sii-xoojinta koboca dhaqaalaha, iyo horumarinta tayada adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka. Wasaaraddaydu waxa kale oo ay la iman doontaa hal-abuur ka dhigaya Somaliland mid tartami kara iyada oo cashuuruha laga dhigi doono kuwa fudud oo caddaali ah. Waxa intaa dheer in dawladdeennu ay hubinayso in bixinta adeegyadu ahaadaan kuwo si siman loo helo oo laga wada muuqdo: gobol iyo degmo kasta oo Somaliland ahi waxa ay heli doonaan khayraadka ku habboon oo caddaali ah si loo badhitaaro koboca dhaqaale ee la wada leeyahay. Muwaadiniinta Somaliland oo dhammi waa inay ka wada faa'iidaan isla markaana ka wada qayb qaataan ka-midho-dhalinta ballaanqaadyada iyo guddoonnada la galay. Sidaa darteed, farxad ayay ii tahay inaan idiin soo gudbiyo ahmiyadda Miisaaniyadda Muwaadinka ee 2020.

Maxaynu Uga Jeednaa Miisaaniyad?

Miisaaniyaddu waa qorshaha maaliyadeed ee sannadlaha ah ee dawladdu u diyaariso qaranka. Waxa ay muujisaa sida dakhliga loo soo saarayo, iyo sida dakhligaa loo isticmaalayo si loo daboolo baahiyaha kala duwan ee muwaadinka iyo Dhaqaalaha. Miisaaniyaddu waxa ay soo koobtaa, si la taaban karo u hirgelisaa, fulinta waajibaadka dawladda iyada oo, isla mar ahaantaa ah, aalad ama tab muwaadinku dawladdiisa kula xisaabtami karo.

Miisaaniyaddu waxa ay dawladda ka caawisaa kala-horraynsiinta baahiyaha kala duwan ee dalka - haddii ay tahay xoojinta dhaqaalaha, adkaynta nabadgelyada iyo horumarinta nolosha - iyada oo hubineysa in wasaaradaha, waaxaha iyo wakaaladaha mas 'uuliyadaha ku lihi helaan hantidii ay u baahnaayeen.

Waa Maxay Hannanka Diyaarinta Miisaaniyaddu?

- **May** – Wasaaradda Maaliyaddy waxay diyaarisaa xaashida odoroska miisaaniyadda
- **Jun** – Wasaaradda Maaliyaddu waxay diyaarisaa Haykalka Dhaqaalaha Guud ee Maaliyadeed
- **Jun-Jul** – Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay la tashataa Guddiga Diyaarinta Miisaaniyadda
- **Jun-Jul** – Wasaaradda Maaliyaddu waxay la tashataa hay'adaha Dawladda
- **Jun-Jul** – Wasaaradda Maaliyaddu waxay talogelisaa Baarlamaanka
- **Aug** – Wasaaradda Maaliyaddu waxay ku wargelisaa Wasaaradaha, Hay'adaha, Wakaaladaha iyo Dawladaha hoose inay soo diyaarsadaan miisaaniyadahooda
- **Aug** – Wasaaradaha iyo wakaaladaha dawladda ayaa diyaarsada soona gudbiya miisaaniyadahooda
- **Sept** – Wasaaradda Maaliyaddu waxay doodo kala yeelataa wasaaradaha iyo wakaaladaha miisaaniyadaha ay soo gudbisteen
- **Sept** – Wasaaraddu waxa ay u gudbisaa miisaaniyadda Golaha Wasiirrada oo wax-ke-beddel iyo oggolaanshoba ku samayn kara
- **Oct** – Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay miisaaniyadda la soo oggolaadey u gudbisaa Baarlamaanka oo wax-ka-beddel ku samayn kara inta aanu oggolaan
- **Nov - Dec** – Madaxweynaha ayaa saxeexa Miisaaniyadda si loo fuliyo
- **Jan** – Wasiirka Maaliyaddu waxa uu u kala diraa wareegto wasaaradaha iyo wakaaladaha si ay u fuliyaan miisaaniyadda
- **Jan-Dec** – Wasaaradaha iyo Wakaaladaha Dawladdu waxa ayu fuliyaan miisaaniyadda
- **Jan-Dec** – Wasaaradda Msaaliyaddu waxa ay oggolaata waarannada kharashgalka ee wasaaradaha iyo wakaaladaha
- **May-Jun** – Hantidhawrka Guud waxa uu baadhaa miisaaniyadda dhammaadka sannad-maliyadeedka

Waa Maxay Miisaaniyadda 202?

Dawladda Somaliland waxa ay ku talo jirtaa in la kharashgareeyo SlShs 2.046 tirilyan sannadka 2020 (oo aanay ku jirin deeqaha caalamiga ahi), taas oo u dhiganta korodhsiimo dhan SlShs 263.846 billion, oo la mid ah 14.8% marka loo eego Miisaaniyaddii 2019. U-kala-qoondaynta loo samaynayo Wasaaradaha, Waaxaha iyo Wakaaladaha ee hantidu kama tarjumeyso oo keli ah kala-mudnaanta muddada dhow balse waxay, sidoo kale muujineysaa yoolka muddada dhexe iyo muddada dheer ee dawladda sida ku cad Qorshaha Horumarinta Qaranka II (NDPII) iyo Fogaan-eegga Qaranka ee 2030. Waxa la filayaa in deeqaha Bangiga Adduunka ee 2020 ay noqdaan SlShs 45.05 bilyan, oo u dhiganta korodhsiimo dhan 9.53% qoondadii 2019 oo dhammayd SlShs 41.21 bilyan.

La soco Cadadka Dambe.....

Wasiirka Maaliyadda Oo Ka Qayb Galay Dooda Iyo Falan Qaynta Miisaaniyadda 2020 Oo Uu Soo Agaasimay Ururka Cilmi Baadhista Ee ISIR

Hargeisa, 25, 01, 2020 (WHM) - Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr Sacad Cali Shire ayaa 9/01/2020-ka ka qayb galay maddal lagu doodayey, isla markaana lagu falanqaynayey miisaaniyad sanadeedka dawladda dhexe ee 2020-ka, taas oo uu soo agaasimay Mac-hadka cilmi baadhista ee ISIR ee xaruntiisu tahay magaaladda Hargeisa. Iyadoo uu Wasiirka maaliyadda Dr Sacad Cali Shire medashaa ka jeediyay warbixin guud oo ku saabsan odoroska miisaaniyadda 2020-ka iyo heerarka ay martay, isagoo sidoo kale kulankaasi oo ka qabsoomay Hotelka Ambassador ee caasimadda Somaliland ee Hargeisa su'aalo farro-badan halkaasi ay ku waydiiyeen bulshadda qaybaheeda kala duwan ee kazoo qaybgashay bar-naamijkaasi oo ahaa mid si heer sare ah loo soo agaasimey, isla markaana ay guud ahaan kasoo qaybgalayaashii munaasibadaa-si iyo hogaanka mac-hadka ISIR halkaasi uga mahadceliyey wasiirka horumarinta maaliyadda Dr Sacad Cali Shire oo isagu goobtaasi ka sheegay inay shacbiga Somaliland xaq u leeyihiin inay madaxda dawladdu uga jawaabto su'aal kasta oo ku taxaluqda adeegyada ay u baahan yihiin.

Sidoo kale waxa kulankaasi wasiirka ku wehelinayey oo lagu casuumay xubno ka mid ah Agaas-imayaasha waaxaha ee wasaaradda maaliyadda. Ugu horayn isagoo wasiir Sacad tafaasiil ka bixinayey qorshaha wasaaradda iyo marxaladihiii ay soo martay miisaaniyadu, waxa hadalkiisa ka mid ahaa "Miisaniyaddu waa qorshe maaliyadeed oo inta badan sanadle ah waxay ka koobantahay dakhli iyo kharash, waxay martaa talaabooyin kala ah 1) Diyaarin 2) Wadatashi 3) Ansixin iyo 4) Dabagal, had iyo jeer dabagalku wuxuu qaataa sanad, tusaale ahaan miisaniyadii 2018 ayuu hada dhamaaday dabagalkee-dii, diyaarintii sanadkan 2020 miisaaniyada waxaanu u raacnay habka caalamiga ah ee loo yaqaano PFM-Ka, markaa habkaa cusub wuxuu leeyahay jadwal sheegaya wakhtiyada la samaynayo qaybaha kala duwan ee miisanaiyada tusaale ahaan wuxuu ugu horaysiinayaa in marka hore la sameeyo wax loo yaqaan (Budget Outlook Paper) document-kan oo sharaxaya xaalada dhaqaale ee dalka maadaama oo ay miisaaniyadu ku fadhido dhaqaal,e waa in marka hore la darsaa dhaqaalaha

dalka waxaa kale oo uu sheegay document-kaa aan soo sheegnay in la sameeyo (Fiscal Framework) warbixintan iyadu sheegay in la sameeyo odoraska dakhliga sadexda sano ee soo socda ka dib waxaa bilaabmay wada tashi waxaanu ka bilaabmaya gudiga siyaasada miisaaniyadda

ka dib markuu dhamaado wada tashiga wasiiradu waxaa hadana la tashanaya gudiga baarlamaanka u qaabilsan miisaniyadda ka dib waxaa bilaabmaya in wasaaradii soo gudbiyaa miisaniyadahoo-dii ayna difaacdaan, miisaniyadu waxaa la qaab ah mid waxa loo yaqaan (INCRIMENTAL) oo ah mid ku salaysan korodh in la kordhiyo kharashkii sanadkii hore sidaad darted wasiirkasta uu soo kordhiyaa miisanaiyadiisa iyagoo ku salaynaya baahidooda mararka qaarkood way soo libinlaaban ama saddexlaabanba ka dib markuu dhamaado falanqaynta miisaniyada ee wasaaradaha waxaa loo gudbiyaa baarlamaanka wuuna soo akhriyaan miisanayadda ka dib suaalo ayaa la naga waydiiyaa waananu difaacnaa miisanyadda ka dib wuu ansixiyaa baarlamaanku markuu ansixyo waxay miisanayadu u gudubtaa madaxwaynaha isagoo ogalaanaya in la isticmaali karo miisaaniyada ka dibna anoo ah wasiirka maaliyadda qoral wareegto ku socota wasaaradaha ay bilaabi karaan isticmaalka miisaaniyadoo-da intaa ka dib waxaa bilaabma kharash bixintii inay wasaarad kasta soo diyaarsato (Warrants) xaashida kharash bixinta si loogu ansixiyo halkaas ayay martaa miisaniyaduu. Wasaaradda maaliyaddu waxay masuul ka tahay diyaarinta, Bixinta iyo ku ilaalinta, sidoo kale ku ilaalinta waxaa masuul ka ah xisaabiyaha guud ee qaranka iyo hanti-dhawrka, oo xisaabiyaha guud ma bixiyo lacag aan waafaqsanayn nidaamka miisaaniyada iyo wixii loogu talo galay. Hadii aan isdultaago qaybta miisaniyadda ee dakhliga, dakhliga badankiisu wuxuu ka yimaadaa kastamada, wadamada horumaray ama aduunka badankiisa dakhligu wuxuu ka yimaada cashuuraha bariga sida cashuurta macaash macaashka , cashuurta iibka , cashuurta shaqaalaha inaga cashuurta badankeedu kama timaad bariga waxay ka timaada kastamka lacagta macaash macaashka oo wadmada badanu koodu lacagta u badan ka hela inaga waxaan qaadnaa 10% halka Somaliyada jaarkiina ay tahay 35%, Jabuuti waa 25%, Ethopia 30%, Kenya 30% markaa cashuurteen aynu qaadno way yartahay, cashuurta shaqaalaha inaga waa isku mid shaqaalaha oo dhan haduu mushahar badanyahay iyo haduu mushaharyahayba waa 6% laakiin wadamada jaarkeena hadaad eegto waxay la korodha dakhliga qofka hadii dakhliga qofku yaryahay waxba lagama qaado hadii qof dakhligiisu fiicanyahayna waxaa loo eegaya heerka wuu ku beeganyahay ilaa qofka u sareeya waxaa laga qaada 35% , cashuurta iibka hadaan eegno innaga waa 5% halka jararkena aya tahay 10% , 16% , 15% marka waxa yar rate-ka aynu waxku cashuurno. Hadaan dib ugu soo noqono dakhligeenu wuxuu ka

yimaada badankiisu kastamka sababtoo ah waxaa adag inaynu helno cahuuraha income, payroll-ka, sales-ka iyo corporation-ka maxaaylay inooma diwaangashana dadka shaqeeya dadka loo shaqeeyo sidaas darted waxaanu ku taagna kastama oo halkaa ayaanu kaga sii qadinaa laakin waxaynu u baahanay inanka guurno mustaqalka waayo la iskuma halayn karo. Xaga kharashka markay timaado ka ugu badan waa amaanka waa boqolkiiba shan iyo sodon 35% laakiin sida caamka ah sidaa maaha marka la eego aduunka kale waa 6% tusaale ahaan Ethopia waa 4% , Jabuuti waa 9%, Kenya 5%,markaa inaga waa inagu dheeraad hadii aynu noqon lahayd sida wadamad aan soo sheegnay waxaa inoo baaqan lahaa lacag gaadhay ilaa 70,000,000 oo aynu waxkale ku qabsan lahayn, marka maxaa keenay inay amaanku intaa inaga qaato waa duruufaha gobalka iyo duruufaha inaga inoo gaarka ah . qaybta ku xigta xagga kharash garaynta miisaaniyada waa maamulka oo ayu badanyihiin arimaha gudaha, baarlamanka iyo cadaaladda".

Madaxweyne Ku-Xigeenka Somaliland Oo Si Rasmi Ah U Daah-Furay Barnaamij-Ka E-Cash

Hargeisa 25/01/2020 (WHM) Madaxwayne Ku-xigeenka Jamhuuriyadda Somaliland mudane Cabdiraxmaan Cabdilaahi Ismaaciil (Saylici) ayaa 13-kii January 2020 si rasmi ah u daah-furay mashruuc ku saabsan hanaan-ka casriga ah ee mushahar siinta shaqaalaha dawlada, kaas oo dhawrkii bilood ee u danbeeyey Wasaaradda Horumarinta Maaliyadu ku hawlanayd hirgalintiisa iyo dhaqaajintiisaba, isla markaana farsamo ahaan uu Baanka Dhexe ee dawladdu kala shaqaynayey. Habkan cusub ayaa noqon doona mid guud ahaan Shaqaalaha dawladda u sahlaya inay mushaharooyin-kooda ku qaataan qaab electronic ah (E-payment system). Waxa xusid mudan in Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL noqotay Wasaaradii ugu horaysay ee ku bilawday shaqaalaheedu inay mushahar-kooda ku qaataan hab-kan casriga ah, kuwaas oo markii ugu horaysay mushaharkooda bishii December ee sanadkii hore ee 2019-kii dhamaantood ku qaatay, isla markaana lacaga-hoodu ugu soo dhaceen telefoona-dooda gacanta. Munaasibada furitaanka oo ka qabsoontay Hotelka Ambassador ee Magaaladda Hargeisa ayaa waxa ugu horayn ka hadlay Wasiirka W.H.Maaliyadda JSL mudane Dr. Cali Shire, wasiirka ayaa si farsama ah u sharaxay adeegan cusub, isagoo wasiirku isla jeer-kaas sharaxaad ka bixiyey faaiidada adeegan casriga ah ee mushahar-bxinta electronic-ga ah, wasiirku isagoo sharaxaya inta nooc ee mushahar-bixinta Hay'adaha iyo Wasaaraddaha Dawladu adeegsadaan

wuxuu yidhi: "Mushahar-bixintu waxay ka koobantahay hada oo lagu bixiyaa Afar (4) nooc, mid toos ah oo lacag Cad gacanta laga bixiyo (Cash), ama cheque ayaa lagu qoraa, ama koontada ayaa loogu shubaa cida le xisaabta (Direct Debit), iyo tan hada aynu wadno oo ah in lacagta shaqaalaha loogu shubo teleefan-kooda gacanta (Wallet/Mobile Money). Inagu inta badan waxaynu ku bixinyaa habka mushahar-bixinta tooska ah ee lacagta Cad gacanta laga siiyo shaqaalaha, kan oo ah kii ugu horeeyey, kaas oo aynu rabno hada inaynu ka guuro". Wasiirka oo sharaxaya kasaaraha iyo faaiidada ay leedahay in lacag Cad ama Cash ah mushahar lagu bixiyaa leedahay wuxuu yidhi:- " Lacag Cad (Cash-ah) waxay leedahay khasaare, mana faaiido la'a, waayo waxaagii ayaad gacanta ku qaadanaysaa oo aad jeebkaaga ku qaadanaysaa sidaad doontana u isticmaalaysaa, balse waxay leedahay khasaare badan sida; iyadoo ay ka qaldanto tirinteedu ka qaadanaya iyo ka bixinayaba, gacmaha ay isu marayso awgeed googo' ku yimaada, kharash ayaa ku baxa rar-ka iyo xamaalida, dayac ama lumintaan ama xatooyadeeda oo sahala, iyo bixinteeda oo wakhti qaatada waayo saf ayaa loo galaa meelaha qaar sida loo kala sahaqaale badan yahay". Ugu danbayna Madaxweyne Ku-xigeenka JSL Mudane C/raxmaan C/laahi Ismaaciil (Saylici) oo hadalkiisii daah-furka barnaamij-kan cusub jeediyey ayaa bogaadiyey muhiimada weyn ee uu leeyahay barnaamijkan casriga ahi waxa uu yidhi:- "Farxad weyn bay ii tahay inaan furo barnaamij-ka mushahar-bixinta electron-ic-ga ah (E-Cash) ee shaqaalaha dawlada, waxay tani kamid tahay mashaariicda dib-habaynta qaybaha kala duwan ee adeegyada dawlada, sida ka maaliyadda, Xeerararka Gar-soorka iyo Cadaalada, ka Shaqaalaha iyo kuwo kale, iyadoo ujeed-ka guud yahay sidii sare loogu qaadi lahaa bixinta adeegyada dawladu u hayso umada". Sidoo kale waxa isaguna madashaasi ka hadlay Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee Somaliland Cali Ibaraahim Jaamac (Baqdaadi) (Bidix) iyo Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha dawladda Farxaan Aadan Haybe iyo madax kale oo ka kala socotay shirkaddaha Isgaadh-siinta ee TELESOM iyo SOMTEL, kuwaas oo dhamaantood muujiyey faa'idada uu shaqaalaha dawladda iyo guud ahaan dalkaba u leeyahaya barnaamijkan cusub ee E-Cash. Ugu danbayna Barnaamijkan ayaa meesha ka saari doono dhibaatooyin

badan oo lagala kulmi jiray mushahar-bixinta, isagoo noqonaya mid ku cusub guud ahaan gobolkan Gees-ka Africa iyo gaar ahaanba wadamada soo koraya, iyadoo ay Somaliland marka horaba ahayd mid hormuud ka ahayd habka casriga ah ee lacagaha laysugu diro.

Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Oo Goboladda Dalka Ku Qabatay Tababar Ku Saabsan Xeer Nidaamiyaha Maamulka Maaliyadda Iyo Hagaha Dhamayska-tiran Ee Habraacyada Xisaabaadka

Hargeisa 25/01/2020 (WHM) - Xafiiska Xisaabaadka guud iyo Waaaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL oo kaashanaya xafiiska maamulka dib u haybaynta maaliyadda ee (PFM) ayaa Goboladda Dalka ku qabtay Tababar Ku Saabsan Xeer nidaamiyaha maamulka maaliyadda iyo Hagaha dhamayskatiran ee Habraacyada Xisaabaadka. Tababarkan oo ah mid mihiim ah ayaa laga fuliyey magaalooyinka Hargeisa, Boorama, Berbera, Burco, Laascaanood, Ceerigaabo, Caynabo, Gabiley, Saylac, kaas oo loo qabtay agaasimayaasha maamulka iyo lacagta, isu-duwayaasha, xisaabiyayaasha wasaaraddaha iyo hay'adaha dawladda. Sidoo kale tababarkan ayaa saraakiishaas lagu barayey casharo ku tacaluqa Barashada xeer-nidaamiyaha Maamulka Maaliyada, Hagahaga iyo habraacyadda xisaabaadka, hir-galinta isla-xisaabtanka iyo dabo galida maaliyadeed (auditing), qorshaha isku xidhka labada mashruuc ee Dibu-habaynta maamulka maaliyada (PFM) iyo Dibu-habaynta Shaqaalaha Dawlada (Civil Servant Reform) iyo siyaasada diyaarinta miisaaniyadda.

Tababarkan oo ah mid mihiimad wayn ugu fadhiya qaranka ayaa noqonaya mid kor loogu qaadayo tayeynta iyo xirfada saraakiisha xisaabaadka gobolada dalka, isla markaana waxa maalgalinaya mashruucan baanka aduunka. Waxaana tababarkaasi oo lagu daahfuray 25 November 2019-kii magaaladda Hargeisa, iyadoo lagu bilaabay agaasimayaasha maamulka lacagta iyo xisaabiyayaasha wasaaradaha iyo hay'adaha dawladda ee ka hawlgala magaaladda Hargeisa ee caasimadda Somaliland.

Sidoo kale Mashruucaas ayaa waxa kale oo faa'iidaysanaya Xafiiska Hantidhawrka guud ee Qaranka, Shaqaalaha xisaabaadka guud ee Maaliyada iyo guddida dabagalka hantida qaranka ee Baarlamaanka.

Furitaankii tababarkaasi ayaa waxa ugu horayn halkaasi ka haday Xasan Faarax Maxamed oo ah xidhiidhiyaha mashruuca PFM-ka ee Wasaarada Horumarinta Maaliyada Somaliland. "Tababarkan oo maanta aynu halkan ku daahfurayno oo inoo socon doona mudo 5 maalmood ah, waxa uu ku saabsan yahay halbeegyada caalamiga ah ee loo diyaariyo warbixinaha xisaabaadka. Waxa aynu doonaynaa oo ujeedada koowaad ee aynu ka leenahay ay tahay in xafiiska xisaabiyaha guud saraakiishiisu ay aqoon u yeeshaan, hanaanka iyo habraacyada caalamiga ah ee lagu diyaariyo laguna soo bandhigo warbixinada xisaabaadka, isla markaana saraakiisha Hanti-dhawrka Guud iyo Hanti-dhawrka guduhuna ay awood u yeeshaan inay qiimeeyaan warbixinadaasi, waxaanu doonaynaa in warbixinadaasi ay la jaanqaadaan ama ay waafaqsanaadaan hanaanka caalamiga ah ee warbixinada loo diyaariyo oo imika ah mid la isku waafaqsan yahay ama mid (standard) gooni ah ama halbeeg gooni ah laga doonayo. Ujeedada guud ee Mashruucan horumarinta maamulka maaliyadu waa in dib u habayn lagu sameeyo, hanaanka loo maamulo ama loo maareeyo maalka maaliyada dawladda, tanina waxa ay qayb ka tahay uun ujeedadaa iyo hadafkaa guud oo maalinba in ama qaybi inoo qaybsanto," ayuu yidhi Xasan Faarax Maxamed oo ah xidhiidhiyaha mashruuca PFM-ka ee Wasaarada Horumarinta Maaliyada Somaliland. Sidoo kae waxa isaguna halkaasi ka hadlay Axmed Nuur oo ah khabiirka tababarkan bixinayey ayaa isaguna halkaasi ka hadlay ayaa waxa uu yidhi "Group-ka ugu horeeya oo ah saraakiisha ka socota Xafiiska Xisaabiyaha Guud ay tahay inay raacaan marka ay diyaarinayaan xisaabaadka ama marka ay record-garaynayaan ama ay qiyaasayaan halbeegyadii iyo heerarkii ay u eegi lahaayeen. Waliba marka si gaar ah ay u diyaarinayaan xisaabaadka hay'adda dawliga ah ee wax-soo-saarka oo markii hore aynu nidhi IPSAS looma isticmaali karo, hanta-dhawr-ka (Internal audit-ka) laftiisu marka uu samaynayo dabagalka uu ku kaantaroolayo cida samaynaysa, cida record-garaynaysa iyo cida diiwaangalinaysa iyaga laftigooda, waxa ay rabaan inay u fahmaan si ay u eegaan oo ay uga daba-jeeggareeyaan qoladii diyaarinaysay iyo qoladii diiwaangalinaysay. Markaa hanta-dhawrka gudaha waxa ku xiga Han-ti-dhawrka Guud oo isaguna samaynaya baadhistii iyo hanta-dhawrnimadii guud, guddida ilaalinta iyo dabagalka hantida qaranka ama loo yaqaano PAC iyaguna marka ay hadhow report-ka uu u gudbiyaan Hanti-dhawrka Guud iyo wixii ka soo baxay ama warbixin maaliyadeedkii ka soo baxay xafiiska xisaabiyaha Guud marka ay eegayaan iyaga laftigoodu waa inay fikrad fiican iyo aqoon fiican ka haystaan hababka loo diyaariyey xisaabahan ay dib u eegayaan (review). Ujeedada ugu weyn ee maanta aynu halkan isugu nimid waa intaas," ayuu yidhi Axmed Nuur oo ah khabiirka tababarkan bixinayey.

Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Furay Kulan hawleedka qorshaha Fulinta odoroska Dakhli Ee Waaxda Cashuuraha Barriga ee 2020-ka

Hargeisa 25/01/2020 (WHM) - Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Md Muuse Ibraahin Yuusuf (Salaf) ayaa 16-kii January 2020 si rasmi ah u furay kulan hawleedka qorshaha fulinta odoroska Dakhli ee Waaxda Cashuuraha Barriga ee 2020-ka, iyadoo hotelka Baraar ee Magaaladda Hargeisa kulan balaadhan loogu u qabtay ma-suuliyiinta cashuuraha barriga ee gobolada iyo degmooyinka dalka. Munaasibadaasi oo ahayd mid si heersare ah loo soo Agaasime ayaa waxa kale oo ka hadlay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Md Maxamed Cabdi Gurxan, Agaasime ku xigeenka Cashuuraha Barriga Khadar Maxamed Muxumed (Kh. Laas), Agaasimaha Waaxda Xidhiidhka Dadwaynaha Iyo Xogta Axmed Muuse Maxanuud, Agaasime ku xigeenka Waaxda Iibka Axmed Ismaaciil Maxamed iyo Agaasimaha Waaxda Cashuuraha Bariga, C/Salaam Maxamed Maxamuud oo isagu ugu danbayn saraakiisha waaxda cashuuraha bariga hadalo dardaaran iyo dhiirigalin iskugu jira halkaasi uga jeediyey. Sidoo kale madaxda wasaaradda horumarinta maaliyadda ee madashaasi ka hadashay ayaa dhamaantood halkaasi ka jeediyey hadalo mahadnaq iyo dhiirigalin iskugu jira, iyadoo ujeedada kulankaasi ahaa mid lagu dardargalinayo qorshaha shaqo ee sanadka 2020-ka. Dhinaca kale Madaxda Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda ayaa Saraakiishaasi Cashuuraha Barriga uga mahadnaqay dadaalkii ay sameeyeen Sanadkii hore maadaama oo Dakhligii Miisaan-iyaddii 2019-kii ay Qorshihii Ku tala-galka ahaa ka batay 5%. Waxaana si wada jira lagu dhiiri-galiyey Masuuliyiinta Cashuuraha Barriga inay ku dadaalaan oo ay uga hawlgalaan sidii ku tala galka dakhliga 2020-ka dadaal loogu gali lahaa sidii uu usoo xaroon lahaa. Ugu danbayn waxa madashaasi lagu qaybiyey Buuga Miisaan-iyadda Muwaadinka oo loogu tallo-galay inay gaadhsiiyaan gobolada iyo degmooyinka ay ka kala yimaadeen.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
WASAARADDA HORUMARINTA MAALIYADDA
WAAXDA CASHUURAHA BERRIGA
Kulan-Hawleedka Qorshaha Fulinta Odoroska
Dakhliga Waaxda C/Berriga Ee
2020

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Maaliyadda Oo Xubno Ka Mid Ah Maayiradda Dalka U Furay Tababarka Daadajinta Nidaamka Maaliyadeed Ee Dawladaha Hoose

Hargies 25,01,2020 (WHM)- Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md Maxamed Cabdi Gurxan ayaa furay tababar loo qabanayey qaar ka mid ah maayirada degmooyinka uu ka socdo mashruuca GPLG-gu, tabbarkaas ayaa socday mudo laba maalmood ah, kaas oo ku saabsanaa dadajinta nidaamka maaliyadeed ee dawladaha hoose, kulan hawleedkan oo ay iska kaashadeen haayada UNSDF iyo Wasaarada horumarinta maaliyada, waxaana furitaankiisi hadalo ka jeediyey xubno ka socda maxadka tabarka shaqaalaha dawlada iyo haayadaha UNka ee mashruuca Somaliland ka taageera iyo aqoonyahano ka socday shirkada caalamigaa ee Dega,waxaanay ka warameen in kulan hawleedkani mihiimad u leeyahay mashuurca maamul daadajinta dawladaha hoose si bulshada loo gaadhsiiyo adeega hufan.

Ugu horayna waxaa halkaa ka hadaly Adan Xasan maataan oo ka socday haayada UNSDF waxaana hadaladisi ka mid ahaa "wasaarada horumarinta maaliyada iyo haayada UNSDF oo is kaashanaya waxaaa shaqo galiyeen shirkada caalmi ah oo loo yaqaan Dega ,taas oo taas oo inagala joogo mr lemun,waxaana ay sameeyen baadhis bishii April ilaa horaantii bisha May taas oo ay ka sameeyeen lacagaha gudba (transfer money) ee dawladha hoose u wareejiyaan dawlada dhexe kuwaas oo loogu talogaly adeeg bixinta ,iyaga oo eegay qaabmiisaaniyadeedka ee dawlada dhexe ee adeegbixinta taas oo ay dawlada dhexe bixiso loona wareejiyo dawladaha hoose".

Sidoo kale maayirka degmada Borama oo ku hadlayey degmooy-inkaasi ayaa ka waramay inuu ku farxasan yahay kulankaasi waxaana hadalis ka mid ahaa, " aniga oo ku hadlay afkii maayirada Somaliland waxaan halkan aad ugu faraxsanahay in manta halkan la isugu yimaado iyada oo la wado kulan hawleedkan labada maalmood ah ,waxaan rajaynayaa inuu noqdo mid midha dhala."

Ugu danbayntiina agaasimaha guud ee Wasaarada horumarinta maaliyada ,Maxamed Cabdi Gurxan oo halkaasi ka hadlay ayaa sheegay in furitaanka kulanhawleedkani mihiimad u leeyahay degmooyinka mashrucani ka socdo ,waxaanu sidoo kale sheegay in kulankani la mid yahay kulamada lagu dardargalinayo maamul daadajinta hanaanka maaliyadeed ee dawladaha hoose si adeegyo hufan loo gaadhsiiyo bulshada degmooyinkaasi ,waxaana ka mid ah hadalkiisi "waxyaabaha ugu mihiimsan ee maalmahan aynu doonayno in aynu dulistaagno oo aynu la eego lemun iyo kooxdisu ay soo diyaaryeen oo ay ugu sida aynu arkayno waxyaabaha ka soo baxay in la istulgaagi doono si kaste oo maamul daadajintu ku haagaagi doonto oo xaalada uu manta marayey looga sii wanaajin karo ayaa qodobada ka soo baxay ay salka ku hayaan, waxaa ku xusan oo aan arkaynaa in waxyaabaha ay heleen in qaabdhismeedka dawladaha hoose iyo nidaamkooda shaqadu ay kujiraan waxyaahaba ay inoo soo gudbiyeen ,waxyaahaba kale ee uu sameeyey waxaa ka mid ah daraasad uu sameyey qaabka dakhli ururinta iyo dhaqaalaha dawladha hoose ,haday noqoto kabka dawlada dhexe uga imanaya ama mashruuca GPLG in ay iyagana inla wadaagi doonana".

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda Somaliland Oo Soo Xidhay Tababarkii Tababarayaasha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda

Hargeisa 25/01/2020 (W.H.M) –Agaasimaha Guud ee wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Md Maxamed Cabdi Gurxan ayaa 21-kii November 2019-kii tababar mihiim ah u soo xidhay 16 sarkaal oo ka tirsan shaqaalaha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland, kaas oo lagu qabtay Mac-hadka Hay'adda shaqaalaha dawladda ee magaaladad Hargeisa.

Tababarkan oo ku saabsanaa Tababaridda Tababbara-yaa-sha ayaaa socday mudo lix cisho ah, taas oo shan cisho oo ka mid ah wax la barayey Saraakiishaas iyo hal maalin oo ah wadaagista khibradaha.

Sidoo kale ujeedada tababarkan ayaa ahayd sidii ay wasaaradu uga kaaftoomi lahayd tababarayaal dibeda uga yimaada, waxaanay taa bedelkeeda ka doorbiday inay dad xula kasoo saarto shaqaalaha waaxaha kala duwan ee wasaaradda ka dibna tiradaa xulka ah la tayeeyo.

Dhinaca kale Waxa iska kaashaday hawshan Wasaarada Horumarinta Maaliyadda, Mac-hadka hay'adda shaqaalaha Dawladda iyo Hay'ada OPM. Sidoo kale Waxa xidhitaanka xafladaas kasoo qayb galay Guddoomiyaha Hay'adda shaqaalaha Dawladda Farxaan Aaden Haybe, Agaasimaha Guud ee W.H.Maaliyada Maxamed Cabdi Gurxan, Guddoomiyaha mac-hadka, Agaasimaha waaxda shaqaalaha W.H.M Maxamed Cabdi Wayrax, Agaasimaha waaxda Xidhiidhka dadweynaha W.H.M Axmed Muse Maxamed, saraakiil kasocotay OPM, macalimiintii tababarka bixinaysay, Waxaana madasha ka hadlay Agaasimaha guud ee Wasaaradda Maaliyadda Maxamed Cabdi Gurxan iyo Gudoomiyaha hay'adda shaqaalaha dawlada Farxada Aaden Haybe, iyagoo labadooduba ku dheeraaday muhiimada tababarkani wasaaradda iyo qaranka guud ahaan u leeyahay. Ugu danbayn waxa la gudoonsiiyey shahaadooyinkii ay mutaysteen tababarayaashii la tababaray.

Wasaarada Horumarinta Maaliyada Oo Hargeysa Ku Qabatay Kulan Lagu Gorfeynayey Dhaqaalaha Somaliland Iyo Caqabadaha Hortaagan

Hargeisa 25/01/2020 (WHM) - Wasaaradda Horumarinta Maaliyada Somaliland, gaar ahaana waaxdeeda dhaqaalaha ayaa Jaamacada Hargeysa (UOH) ku qabatay kulan si balaadhan loogu lafa-guray arimaha dhaqaalaha iyo caqabadaha hortaagan horumarka dhaqaalaha Somaliland. Kulankan ayaa waxa ka soo qaybgalay aqoonyahano iyo masuuliyiin ka socday Jaamacadaha Somaliland, Saraakiil ka socday Wasaarada Maaliyada, iyo Saraakiil ka socday Baanka Dhexe ee Somaliland, iyo Wasaarado kala duwan oo kale. Waxaana kulankaasi ka hadlay Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maaliyada Somaliland Dr Sacad Cali Shire, kaas oo faahfaahin ka bixiyey "Mudadii u dhaxaysay 2012 ilaa 2017-kii, shantaa sanadood dhaqaalaheenu isku celcelin wuxuu korayey dhaqaalaheenu boqolkiiba laba kaliya (2%) marka la isticmaalo (base price-ka oo ahaa 2015). Hadii aynu isweydiino waa maxay qaybaha kaalinta koowaad kaga jira dhaqaalaheena.

1. Kaalinta ugu horaysa waxa kaga jira Xoolaha oo ah 28%, waa inta tooska ah.
2. Ganacsiga (Retile and hold sale) ku waa 22%.
3. Dhismaha (real state-ku) waa 10%.
4. Beerahana ilaa 8%.

Intaasaa runtii ugu roon roon. Inaynu ogaano qayb walibakaalintaayleedahayinaynuogaano,waayoimika qaybtaXoolahahadiiaynukobcinoboqolkiibahal(1%), dhaqaaluhuna waxa uu kobcayaa boqolkiiba (0.3%). Qaybta Warshadaha, tusaale ahaan qaybta ay kaga jirto dhaqaalaha waxa weeyi boqolkiiba (1.7%) ayay ku biiriyaan Warshaduhu (industries-ku) Dhaqaalaha dalkeena, hadii aynu kobcino boqolkiiba hal (1%), waxa dhaqaalaha dalka ku soo biiraya (0.017%), markaa waaa muhiim inaynu ogaano dhaqaalaheena qaybaha kala duduwan mid waliba kaalinta uu ku leeyahay. maalgashiga waxaad moodaa imika inaykalagoʼanyihiinintiimaalkahaysay,intiimaskaxda haysay iyo intii muruqa haysay, saddexdii baa kaa goʼan oo ninkii fikirka hayey ee aan maalka haynin meel uu maal u doontaa ma haysto ama way yartahay ama way ku adagtahay," ayuu yidhi Wasiirka Horumarinta Maaliyada Somaliland Dr Sacad Cali Shire. Sidoo kale waxa kulankaasi ka hadlay Gudoomiyaha Bangiga Dhexe ee Somaliland, Cali Ibraahim Jaamac (Baqdaadi) oo isna ka waramay caqabadaha hortaagan Dhaqaalaha iyo ahmiyadda uu kulankani leeyahay. Dhinaca kale Agaasimaha Waaxda Dhaqaalaha ee Wasaarada Maaliyada, Cabdirisaaq Cali oo isna ka waramay ahmiyadda kulankaasi ayaa waxa uu yidhi "Waxa aynu maanta isugu nimid inaynu furno shirk u saabsan lafa-gurida arrimaha dhaqaalaha wadanka iyo caqabadaha hortaagan, markaa shirku arrimahaasi ayuu ku saabsan yahay. Waxaana inagala soo qaybgalay qaybo kala duwan oo ka socda Wasaaradaha kala duwan ee dawladda iyo qaybaha gaarka loo leeyahay ee (privet sectors-ka). Waxaynu martigalinay oo Wasaaraddu ay fududaysay hayʼaddaha aqoonta ee (academic institutions-ka), Dhaqaaleyahanada, iyo qaybaha gaarka loo leeyahay ee (private sectors-ka)." Ayuu yidhi Agaasimaha Waaxda Dhaqaalaha ee Wasaarada Maaliyada Somaliland, Cabdirisaaq Cali.


Minister
D. Minister
Director General
Local Advisors
International Technical Team
Admin & Finance
Human Resource
Customs
Inland Revenue
Budget
Procurement
Public Relations
Statistics & Micro finance
PFM
FMIS & IT
Internal Audit
Legal Services
Accountant General
Financial Sector

Wax Ka Barro Cashuurta Gadista Ee Loo Yaqaanno "GST-ga"

Halkan Hoose Ka Daalaco Su'aalo Iyo Jawaabo Ku Taxaluqa Cashuurta Adeegga Iyo Iibka Badeecadda

S: Waa Maxay Cashuurta Adeegga Iyo Iibka Badeecaddu?

J: Cashuurta Adeegga iyo iibka badeecaddu waxa weeye "Cashuurta ku waajibtay badeecadda la soo dejiyo iyo badeecada laga soo saaro gudaha waddanka ee ku xusan qodobka 153-aad ee Xeerka dakhliga iyo adeegyada kala ah iibka biyaha, korontada, is-gaadhiisnta, adeegga hudheellada iyo socdaallada.

S: Yey Ku Waajibtey Cashuurta Adeegga Iyo Iibka Badeecadduhu?

J: Cashuurta adeegga iyo iibka badeecaddu waxa ay ku waajibtay: badeecad la soo dejiyay, alaab warshadi ku farsamaysay gudaha dalka iyo cidda fulinaysa adeegyada cashuurtani ku waajibtey ee qodobka koobaad ee cutubkan.

S: Imisaa La Bixiyaa Cashuurta Adeegga Iyo Iibka Badeecaddaha?

J:Cashuurta adeegga iyo iibka badeecaddaha waxaa la bixiyaa: boqolkii ba shan (5%)

S: Miyaa Layga Baahan Yahay Wax Macluumaada Ah?

J: Macluumaadka cashuurta adeegga iyo iibka badeecaddaha lagaga baahan yahay waxa weeye: in aad keentid Xisaab xidhkaaga bil walba bisha xigta koob iyo labaatankeeda ugu danbayn.

S: Sidee Loo Bixiyaa Cashuurta Adeegga Iibka Iyo Badeecaddaha?

J: Cashuurta adeegga iyo iibka badeecaddaha waxaa loo bixiyaa: si la mid ah sida loo bixiyo cashuuraha kale waxaanay raacaysaa shay kasta oo la iibiyo ama badeecad walba iyo adeeg walba.

S: Maxay yihiin kharashaadka lay ogol yahay?

J: Wax kharash ah laguuma ogola.

S: Goormaa La Bixiyaa Cashuurta Adeegga Iibka Iyo Badeecaddaha?

J: Cashuurta adeegga iyo iibka badeecaddaha waxaa la bixiyaa: bil kasta marka ay dhammaato. Ugu danbayn koob iyo labaatanka (21) cisho ee bisha xigta, bishaa cashuurtu waajibtay.

S: Xaggee Lagu Bixiyaa Cashuurta Adeegga Iibka Iyo Badeecaddaha?

J: Cashuurta Adeegga iyo iibka badeecaddaha waxaa lagu bixiyaa: goob kasta oo cashuuro beri oo lagu bixiyo cashuuraha kale ee beriga.

S: Haddii Aan La Habsaamo Maxaa Dhacaya Cashuurta Adeegga Iibka Iyo Badeecaddaha?

J: Cashuurta adeegga iyo iibka badeecaddaha haddii aad la habsaanto waxaa dhacaya: Ganaax.

S: Maxay Yihiin Ganaaxyada Cashuurta Adeegga Iibka Iyo Badeecadduhu?

J: Ganaaxyada ka dhalanaya waxay kala yihiin: 1. Keenid la'aanta Xisaab-celinta cashuurta adeegga iyo iibka badeecaddaha waxaa ka dhalanaya dambi wuxuu na mudanayaa danbi fudud oo aan ka badnayn 15 currency point (1500 dollar) 2. Bixin la'aanta cashuurta Adeegga iibka iyo badeecadduha waxaa ka dhalanaya Ganaax lacageed oo ah 2% oo ku dhacaya qadarka guud ee cashuurta la bixin waayay bil walba laga bilaabo Maalinta ay ahayd in la bixiyo ilaa inta laga bixinayo sida uu sheegayo qodobka 16aad ee Xeerka dakhliga cashuurtaha beriga.

Shir Lagu Lafo-gurayey Qorshe-Hawleedka 2020-Ka Ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland Oo Hargeisa Lagu Qabtay

Hargeisa 25/01/2020 (WHM) - Shir Lagu Gor-faynayey Qorshe-hawleed-ka 2020-ka ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland ayaa 17-kii January 2019-ka ka qabsoomay Hotelka Grand Hadi ee Magaaladda Hargeisa. Kulankaas oo lagu falanqaynayey qorshe hawleedka 2020-ka, ayaa sidoo kale lagu falanqeeyey qaabka ugu haboon ee waax walba u fulin lahayd Qorshe hawleedkeeda u dajisan. Sidoo kale Shirkan oo ahaa mid mihiimad wayn u leh wasaaradda horumarinta maaliyadda iyo qarankaba ayaa waxa kasoo qaybgalay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, Dr Sacad Cali Shire, Wasiir ku xigeenka Md Muuse Ibraahin Yuusuf (Salef), Agaasimaha Guud Md Maxamed Cabdi Gurxan, Xisaabiyaha Guud ee qaranka Md Axmed Daa'uud Geedi, dhamaan Agaasimeyaa-sha iyo ku xigeenada 14-ka Waaxood ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Somaliland.

Dhinaca kale Wasiirka wasaaradda horumarinta maaliyadda, wasiir ku xigeenka iyo agaasimaha guud oo madashaasi hadal kooban ka jeediyey ayaa iyagu dhamaantood ku dheeraaday mihiimada kulankaasi, iyagoo madaxda waaxaha wasaaradda kula dardaarmay inay si fiican u gutaan waajibaadada saaran, iyagoo tibaaxay in waax walba lagula xisaabtami doono qorshaha u dajisan ee loo asteeyey. Dhinaca kale kulankaas ayaa daba-socday kulan hore oo isaguna xafiiska wasiirka ka qabsoomay 04/11/2019, kaas oo warbixino lagaga dhagaystay madax Waaxaha kala duwan ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, kuwaas oo ay agaasimayaasha waaxuhu tafaasiil kaga bixinayeen qorshe-hawleed-ka 2020-ka iyo 2021-ka ee mudada dhaw (short term) iyo waliba sidoo kale mudada dheer (long term).

70 Arday Oo Kusoo Baxay Imtixaankii Barnaamijka Waxbarashadda Ee Maamulka Maaliyadda Ee Pfm-Ka oo Si Rasmi Ah U Bilaabay Waxbarashadoodi

Barnaamijkan ayaa waxa iska kaashanaya Wasaaradda Maaliyadda Somaliland, Jaamacadda Hargeisa, CIPFA, WYG Iyo MPC

Hargeysa, 25,01,2020 (WHM) – Waxa waxbarashadoodii oo mudo saddex sano ah socon doonta ay uga bilaabantay Jaamacadada Hargeisa 70 xubnood oo ka mid ah shaqalaha dawladda Somaliland oo ka kala socday wasaaradaha iyo hay'adaha kala duwan ee qaranka, kuwaas oo loo daah furey barnaamij waxbarasho oo lagu kobcinayo aqoontooda waxbarasho. kulankaasi lagu daahfurayey bilawga waxbarashada ardaydaasi ayaa lagu qabtey jaamacadda Hargeisa 30/10/2019-kii, iyadoo halkaasi lagula dardaarmey ardeydaas ka faa'ideysaney-sa barnaamijka waxbarasho ee mihiimka ah. waxaana ma-suuliyiintii halkaasi ka hadley ka guddoomiyaha jaamacadda Hargeisa DR. Mohamuud Yuusuf Muuse iyo xidhiidhiyaha mashruuca PFM Md Xasan Farax Maxamed, kuwaas oo halkaasi kula dardaarmay ardaydaasi isla markaana ku guubaabiyey inaanay dayacin fursadaasi mihiimk ah. Sidoo kale Barnaamijkan oo ardayda ku guulaysatay ay ka kala socdaan Hay'adaha iyo Wasaaradaha kala duwan ee dawladda ayaa waxa iska kaashaday Wasaaradda Maaliyadda Somaliland, Jaamacadda Hargeisa, CIPFA Oo ah Mac-had Caalamiya , WYG oo ah hay'ad Ingiriis ah Iyo MPC oo isna ah Mac-had kale oo Caalamiya.

Waxa kale oo isaguna madashaasi ka hadlay Cabdirashiid Guray oo ka oo ka mid ah madaxda jaamacadda Hargeisa, waxaana hadaladiisa uu ku bilaabay "Maanta waxa daahfurkani u taagan yahay ama mudan yahay laba qadob in aanu shaacino in anu bilowney mashrucan glass kii la qatey oo la idinku soo dhaweeyo in galasiskiinii bilaabmayaan, waxa ay ahayeen ardeyda soo codsatey 180 ardey, imtixaan laga qaadey ama lagu tijabiyey herka aqoontooda luuqada waxa soo baxay oo nasiib u helay 70 ardey, kuwaas oo noqdey kuwii u sareyey ee la qaato ''

Waxa kale oo halkaasi ka hadlay Md Xasan Farax Maxamed oo ah xidhiidhiyaha mashruuca dib u habaynta maamulka maaliyadda ee PFM-ka, waxaana hadalkiisa ka mid ahaa "Mashruucan aanu maanta fureyno waxa iska ka kaashadey shan hayadood oo kala ha CIPFA oo ah mac-had caalamiya oo ka dhisan ingiriska WYG oo yaduna ingiriis ah, MPC oo isna ah Mac-had kale oo Caalamiya, jamacad hargeisa iyo PFM waxa maal galiyey baanka aduunka, ujeedada aanu ka leenahay barnamijkan waxa weeyan inaanu soo saarno shaqaalihii kasban laha dib-uhabeynta maamulka maaliyadda ,waxaana la socota aqoon iyo xifrad kala duwan. markaa waa in la sameeya cidii kasban lahayd waxa ugu tala galney inuu socdo mudo sadex sano ah, ardaygu hadu galo hal exam waxa la siin donaa hal reside exam oo fursadu leeyahay laakiin waxa kale oo laga doonaya ardeyga imtixaankasta wuxuu leeyahay lacag u gooniya oo la shubi doono, waa inaanu si dhayala casharada uga maqnaan oo uu si sax ah u qaataa hadii aad qaadan waydo oo aad ka maqnaatid ama khasaarisid waxa ad khasarisey dawladii oo waxa aad lumisay fursad qof kale kaga faaidaysan lahaa. Sidoo kale heshiska noo yaala wuxuu yahay in laga qaadi doono lacagta inaad bixiso oo dib lagaag gudi doono, walibana hay'adda aad ka socoto aanu toos ula xidhidhi doono. Sidoo kale 40-ka ardey ee u danbeeya waxa ku bixi doona lacag dhan $5000 dollar calaa ardey". Dhinaca kale waxa kale oo halkaasi ka hadley Guddoomiyaha Jamacadda Hargeisa DR. Mohamuud Yuusuf Muse waxa hadalkiisi ka mid ahaa "Waxa laguu dhigi doonaa laba ku hagaya iyo laba ku saxaya, wixi kugu adkaada oo kugu celinaya, waxaad ka wada timaadeen wasaarado, waxaana la soo gala 8-da subaxnimo, waxaana laga baxa 12-ka duhurnimo, marka la tukado, waxaana ku qoron wasaradda in 8 saacadood la joogo, caalamka waxa laga baxaa shanta galabnimo ma kula tahay qof xiligas soo baxay inu dib waxbarasho usii galayo? waxa la idin qalabeeyey laybareeri aad wax ku akhrisataan oo ku dhex yaala jaamacadda dhexdeeda".

Kulan Hawleed Lagaga Hadlayey Maamul Wanaagga, Daahfuraanta Iyo Isla Xisaabtanka Oo Hargeisa Lagu Qabtay

Hargeisa, 25, 01, 2020 (WHM) - Kulan ay si wada jira usoo qaban-qaabiyeen Hanti-dhawraha Guud ee qaranka iyo Xafiiska Dibu-habaynta Maamulka Maaliyada ee PFM, kana soo qayb galeen xubno ka kala socday ururada saxaafada iyo bulshada rayidka ah ayaa 16/ 11/ 2019-kii ka dhacay magaalada Hargeisa. Waxaan kulankaasi lagu gorfeeyey sidii ay u wada shaqayn lahaayeen saxaafada, ururada bulsha-da-rayidka ah, Hanti-dhawraha Guud iyo Xafiiska Dibu-habaynta maamulka maaliyada ee PFM-ku. Waxa kale oo ka soo qayb galay ku xigeenka hanta dhawraha guud ee qaranka iyo xidhi-idhiyaha mashruuca dib u habaynta maamulka maaliyadda ee PFM iyo masuulyiin kale. Waxaana lagaga wada hadlay doorka wada-shaqeyneed ee ka dhaxaysa ururada bulshada raydka, saxaafada iyo xukuumadda. Ugu horayn waxa halkaas ka hadal ka jeediyey xidhiidhiyaha mashruuca dib u habaynta maamulka maaliyadda ee PFM-ka Hassan Faarax oo ka hadlay ahmiyadda kulankaasi

leeyahay, kaas oo sheegay in ujeedadsiisu tahay in laysku xidho ama lagaga wada hadlo wada shaqaynta ay yeelanayaan xafiiska hanti dhawraha guud iyo ururada bulshada iyo saxaafadu, waxaana hadaladiisa ka mid ahaa "Guud ahaan mashruuca dib u habaynta maamulka maaliyadda ujeedada aynu ka leenahay waa hanaanka loo maamulo maaliyadda qaranka ay noqoto mid daah furan isla xisaabtan leh isla markaana dabaqaya nidaamyada ugu wanaagsan dhinaca maamul wanaaga". Isagoo hadalkiisa sii wata waxa uu intaas ku daray "Si taas loo gaadho waa in qolo kastaa ama xafiis kastaa ama koox kastaa qaadataa doorkeeda, sida doorka saxaafada, doorka ururada bulshada iyo doorka hanti dhawraha guud, wada shaqayn intee leeg bay wada yeelanayaan". Sidoo kale waxa halkaas ka hadlay Ku xigeenka Hantidhawraha Guud ee Qaranka Somaliland Sacad Cabdi Cabdilaahi Riiraash, kaas oo jeedada kulankaasi ku sifeeyey sidii la iskula gorfayn lahaa fikirka laga aminsanyahay ka xafiis ahaan ee hanta dhawrka iyo bulshada, wuxuuna ugu baaqay saxaafada iyo ururada bulshada ee ka qab gashay kulankaas inay gaadhsiiyaan bulshada natiijada ka soo baxda kulankaas. Sidoo kale waxa uu sheegay in nidaamka xafiiska hanti dhawraha guud in maanta uu leeyahay nidaam transparent ah iyo nidaam daah furnaan ah iyo maamul wanaag iyo isla xisaabtan leh, kaas oo tilmaamay inuu rajaynayo kulankaasi ay kasoo bixi doonaan natiijo wanaagsani.

Dedaalada Ku Wajahan Horumarinta Dhaqaalaha Iyo Doorka Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu Ku Leedahay

Koboc dhaqaale oo jiraa waxa uu asaas u yahay horumarka Somaliland iyo dhanka nolosha, si ay taasi u hir gasho waxa lagama maarmaan ah in siyaasado dhaqaale oo ay ku lamaantahay horumarinta dhinaca ka faa'iidaysiga Khayraadka dalka la sameeyo. Iyadoo laga duulayo baahiyaha jira waxay Wasaarada Maaliyaddu diyaarisay siyaasado dhaqaale oo dhowr ah, kuwaas oo u baahan in wax lagaga qabto miisaaniyadda sanadada soo socda, sida shaqaalaysiinta dhalinyarada, kor u qaadida wax soo saarka gudaha, ilaalinta warshadaha maxalliga ah, hagaajinta isu dheelitirka sarifka lacagaha, xasilinta qiimaha sarifka lacagaha qalaad, sugidda amniga iyo caddaaladda, hirgalinta doorashooyinka xortaah iyo caddaaladda, iyo hagaajinta adeegyada aasaasiga ah ee bulshada (biyaha, caafimaadka, waxbarashada, iyo Badbaadinta deegaanka). Si wax looga qabto arimaha kor ku xusan waxa lagama maarmaan ah in Wasaarada Maaliyaddu ay mashaariicda horumarineed ee miisaaniyaddu ay yeelan doonaan saami qaybsi caddaalad ah gobol iyo degmo kasta waxay u baahan doonaan in la qiimeeyo iyada oo lala kaashanayo wasaaradaha iyo hay'adaha ay khusayso. Wasaarada Horumarinta Maaliyaddu iyadoo ka duulaysa xaalada dhaqaale ee wakhtigan, waxay ku dedaashay miisaaniyad sanadeedkan 2020 iyo wixii ka dambeeya lagu diyaariyo hab iyo shuurudo waafaqsan baahiyaha, si looga hirgaliyo maalgashiga qaybaha farsamada ee mudnaanta leh, iyo in la buuxiyo dhibaatoyinka maamulka hay'adaha dawladda, si gacan looga geysto gaadhista ujeeddooyinkaas balaadhan. Waasaradda Horumarinta Maaliyaddu waxay higsaneysaa in ay kordhiso saamiga dakhliga ee dakhli ururinta (sida hagaajinta hanaanka

uruurinta iyadoo la isticmaalayo habka elektaroonikada ah), yareynta deymaha dowladda, yaraynta musuqmaasuqa iyo u sinaanta khayraadka dalka, lana ilaalinayo helida miisaaniyad isku dheelitiran. Intaa waxaa dheer, siyaasadaha lacageed oo wafaaqsan in la gaadho qorshaha yoolalka mi-isaaniyadda ee dowladda. Kuwaas waxaa ka mid ah xasilinta sicir bararka qiyaastii 5% -6.5%, heerka sarrifka 8,000-8500 SLShs /USD iyo yaraynta farqiga u dhexeeya sicirka sarrifka rasmiga ah ee dawladdu is ticmaasho iyo ka suuqa. Iyadoo dawladda ku dedaalaysa siyaasaadda ku wajahan dhanka lacagta waxa hadana mararka qaar soo waajaha dhibaatooyin dhaqaale oo ka baxsan awoodeeda, waxaynu tusaale u soo qaadan karnaa, xayiraadii dhoofinta xoolaha bilowgii 2017, Shilinka Somaliland wuxuu si dhakhso ah hoos ugu dhacay sarifka lacagta doollarka Mareykanka; kaas ka kordhay 7,556 SLShs gaadhayna 9,328 SLShs halkii Doolar sanadki 2018. Sanadka 2019, Shilinka Somaliland ayaa gaadhay 8,308 SLShs halkii Doolar bishii 5aad ka hor intaanu waxyar kor u kicin 8,400 SLShs bishii Juun. Lixdii bilood ee ugu horreeyay sannadka 2019, celceliska sarrifka wuxuu ahaa 8,729 SLSHs / USD oo u dhigan qadar dhan 16.9% uu qiiamaha shilinku kordhay marka loo eego sanadkii 2018. Qiimaha Shilinka Somaliland ayaa inta badan ah mid ka turjumaya dadaalka Wasaaradda Maaliyadda iyo Bangiga Somaliland ay ku doonayaan inay ku gaadhan bartil-maameedka sarrifka 8,500 SLShs / USD. Maaddaama dollar ku yahay lacagta qalaad ee u badan dhanka sarrifka, bartilmaameedkan ayaa loo dejiyay si loo ilaaliyo kuwa ku hela mushaharkooda SLShs iyo kuwa qaata Doolarka. Hawlaha Bangiga waxaa ka mid ah xayiraad lagu soo rogo shirkadda labada bixiyeyaasha adeegga lacagta ee mobiilka-iyadoo la joojiyey macaamil ganacsi lacageed oo ka yar US $ 100, inta waxa dheer iyada oo la xakeemeyey ganacsatada sarrifka lacagaha qalaad. caqabadaha ganacsi oo aad u weyn waxa kamida dhoofka xoolaha taasoo si weyn looga dareemay dhaqalaha dalka, sanadkii 2015 waxaana loo malaynayay in dhoofka xooluhu sii kordhayo sanadaha ku xiga. Tirada xoolaha nool ee la dhoofiyay 2018 waa kuwo ka hooseeya dhoofka xolaha ee sanadkii 2007, wadarta dhoofinta ayaa hoos u dhacday 26% (492,649 neef) laga bilaabo 2017. Si kastaba ha ahaate, dhaqaalaha wax soosarka dalku waxa u ka soo kabanayaa dhammaan dhibaa-tooyinki ka yimi dhanka abaaraha iyo ganacasiga caalamiga ee la xidhiidha dhanka dhoofka xoolaha. Lixdii bilood ee ugu horreeyay sannadka 2019, wadarta dhoofinta xoolaha waxa ay ka badan tahay 22% marka loo eego lix biloodki u horeey ee sanadkii 2018. Ugu danbayn Wasaaradda Hormarinta Maaliyaddu waxay dedaal ugu jirtaa sidii loo heli lahaa siyaasado dhaqaale oo hufan kana turjumaya baahiyaha dhaqaale ee hadda jira, kuwaasi oo ay ka mid yihiin siyaasadda dhaqaalaha wax soosaarka, siyaasadda ganacasiga caalamiga, siyaasada maamulka lacagta, siyaasadda dakhliga iyo kharashka, siyaasadda daynta dawladda, kuwaas oo dhamaan ka qayb qaadanaya gaadhitaanka ujeedooyinka ku wajahan horumarka dhaqaale ee Somaliland. Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Waaxda Dhaqaalaha Iyo Tiro-Koobka.

Agaasimaha Waaxda Shaqaalaha Ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Ayaa Tobabar U Furay Shaqaalaha Nadaafadda Ee Waasaaradda

Hargeisa, 25, 01, 2020 (WHM) - Agaasimaha Waaxda shaqaalaha ee wasaaradda horumarinta maaliyadda JSL Md Maxamed Axmed Wayrax ayaa tababar noociisu yaryahay u furay shaqaalaha nadaafada Wasaaradda Maaliyadda, tobabarkaasi oo socday muddo afar maalmood ah ayaa loogu talo galay in kor loogu qaado aqoonta shaqaalaha nadaafada ee Wasaaradda Maaliyadda si loo dar dar galiyo shaqaalaha. Waxaana halkaas ugu horayn ka hadlay agaasimaha waxaad shaqaalaha ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Mudane Maxamed Axmed Wayrax waxaana hadaladiisii ka mid ahaa isagoo la hadlaya shaqaalaha tobabarka loo qabanayay "Runtii shaqadan aad haysaan waa shaqo muhiim ah xafiiska kasta oo ka mid ka mid ah dawladda qofka ugu horeeya ee fura waa qof idinka oo kale ah sidaad darted waxaa haboon maadaama oo aad ka shaynaysaan nadaafad in idinka nadafaadiinu dhisantahay inaad goobta aad ka shaynaysaan aad ku qaabishaan waji wanaagsan oo farxad ku dheehantahay inaad markaad xafiiska galaysaan aad ducaysataan xafiiskana u ducaysaan ka dibna shaqadiina aad bilaabataan". Waxaa sidoo kale gobtaas ka hadlay agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Lacagta ee wasaaradda maaliyadda Md Xuseen Xasan isagoo sheegay in aqoon korodhsigan uu yahay mid casri ah oo la jaan qaadaya adeegyada nadaafadeed ee caalamiga ah isagoo ugu baaqay ka qayb galayaasha tobabarka inay ka faaidaystaan inta uu tobabarkaasi socdo sidoo kale agaasimuhu wuxu ku dardaaray shaqaalaha nadiifisooyinka inay ilaaliyaan document-ka xafiiskyaala iyo lacagaha ama qasnadaha yaala xafiisyahada qaarkood sidoo kale wuxuu sheegay agaasimuhu in qalabka la nadiifinayo ay kala duwanyihiin qabaabka loo nadiifiyo lana idinku tababari doona qaababka loo nadiifiyo qaarkood waa (electoric) qalab dabaysan sida computers-ka, Laptops-ka, printers-ka sidaad darted waxaan filaynaa inaad tobabarkan aad wax badan ka korodhsan doontaan idinka laftiinu aad aqoon ahaan kor u kacdaan oo qof meel uun ma taagnaadee hore u socod aad seemyaa inaad qaarkiin ka dalacdaan ayaa la filayaa halkan imika aad joogtaan iyadoo imikaba ay qaarkiin waxbartaan oo ay dadaalaya.

Adeer U Banee! Cashuur Iyo Daad toona Lama Hor Joogsadee
Cashuurtu waa
Naftaada Ka Qaad Oo Naftaada u Qaad

Faaraxow saaxiib saban-kan dadka wegerta uun baa shaqaysee wax qabadku wuu muuqdaa, Wasaaradda Maaliyaduna way kasoo dhalaashay kaalinteedii.
Waar heedhe soowtii la lahaa miisaaniyada dawladu mushahar iyo gunooyin uun bay ku baxdaa, waa maxay waxan oo mashaariic ah ee ay dawladu fulisay.


Wacyigalinta
XALAALBAA BARAKOWDEE XOOLAHAAGA CASHUURO
Adeer Maanad i Garanayn! Wixii Doonaaba ha ku jiraan hoostee, dusha hal mobile baa ku sawiran eekaas uun cashuur
Ruqo kii lahaa dabada hayaa ma kacdo! ma adigii ganacsadaha wayn ahaa baa sidaas u dhaqmaaya. Iaba iyo toban mobile ayaa ku jira markaasaad i leedahay hal uun cashuur.
MAXAAD KA TAQAANAA MARXALADAHA CIQAABTA EE CASHUURTA
A. Xadhig
B. Ganaax Lacageed iyo
C. In Ruqsadda lagala noqd

A : MULKIILE
Waar Si Aan Cashuur Lay Nooga Qaadin Gaadhiga Wado Aan la isticmaalin Soo Mari Kuwii Baasaa ee Maaliyadu Yaanay Ku Arkine
B :SHAQALE
Mudane Kharashka inagaga Baxa Kootarabaanintu Wuxuu ka bataa mararka Qaar Cashuurta Aynu ka Baxsano.